# Codsiga Soo jeedinta (Request for Proposal, RFP) ee Maalgelinta Barnaamijka Xagaaga 2022

*Maalgelinta uu bixiyo Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha, Gobolka Washington (Superintendent of Public Instruction, State of Washington, OSPI)*
*Horumarisay oo ay Maamusho School's Out Washington (SOWA)*

**Codsiyada waxaa la rabaa Isniinta, Diseembar, 6, 2021 saacadu markay tahay 11:59 duhurnimo.**

## Horudhac

Office of the Superintendent of Public Instruction (OSPI) waxay iskaashi la samaynaysaa School's Out Washington (SOWA) si loo horumariyo oo loo maareeyo Maalgelinta Barnaamijka Xagaaga 2022 (Summer Program Fund). Lacagtani waa qayb ka mid ah maalgashiga laba sano ee OSPI ee barnaamijyada xagaaga iyadoo la adeegsanayo ilaha Qorshaha Badbaadinta Mareykanka/Elementary and Secondary School Emergency Relief (ESSER) (Gargaarka Degdegga ee Dugsiyada Dhexe iyo Sare). Hadafka aasaasiga ah ee Maalgelinta Barnaamijka Xagaaga waa in la balaariyo fursadaha dhalinyarada Washington oo ka fog cadaalada[1] waxbarashada si ay uga qayb qaataan barnaamijyada xagaaga 2021 iyo 2022 oo ay ku jiraan isku xirka bulshada, iyo dhaqdhaqaaqa jirka iyo dibadda.

Laga soo bilaabo gu'gii 2020, masiibada COVID-19 waxa ay wax u dhimtay awoodaha qoysaska, dugsiyada iyo ururada horumarinta dhalinyarada si ay si buuxda oo wax ku ool ah ula kulmaan bulshada, shucuurta, caafimaadka maskaxda iyo baahiyaha waxbarasho ee ardayda. Dhalinyaradu waxay go'doomiyeen xaddidaadda waxbarashada casriga ah, qoysaskuna waxay la halgameen daryeelka carruurta. Dhallinyarada ka fog caddaaladda waxbarashada, oo ka xaddidan helitaanka barnaamijyada iyo adeegyada ayaa sii kordhisay sinnaan la'aanta jirta.

In kasta oo ay jiraan dhibaatooyin, ururrada horumarinta dhallinyaradu waxay la qabsadeen adeegyadooda si ay ugu jawaabaan dhalinyarada iyo qoysaska ay si qoto dheer ugu xiran yihiin. Sida saamaynta COVID-19 ay u fududaato, ururadani waxay si fiican ugu taagan yihiin inay bixiyaan barnaamijyo xagaaga 2022 oo ka dhex jira bulshooyinkooda kuwaas oo kor u qaadi doona xiriirka bulsho ee dhalinyarada ka maqnaa sababo la xiriira bandowyada iyo karantiilnimada, oo siiya fursadaha dhaqdhaqaaqa jirka iyo dibadda, iyo sii wadida ladnaanta dhalinyarada iyadoo Washington ay ka soo baxayso masiibada.

## Guudmarka RFP

Maalgelinta Barnaamijka Xagaaga 2022 wuxuu ku dhismi doonaa casharadii laga bartay habka Maalgelinta Xagaaga 2021. Isagoo ka shaqeynaya caqabado adag, $1 milyan ayaa markay aheyd Agoosto, 2021 loo qeybiyay 62 codsade oo guuleystay, oo ka mid ahaa 277 urur oo codsaday. Barnaamijyada la maalgeliyay waxay heleen inta u dhaxaysa $5,000 iyo $25,000.

Xagaaga 2022, ku dhawaad $4.5 milyan ayaa loo heli doonaa maalgelinta barnaamijka u dhaxaysa $10,000-$50,000. Habka iyo waqtiga ayaa qaadi doona abaalmarino waaweyn iyo tiro badan oo codsiyo la maalgeliyo.

---

[1] Ujeedooyinka Maalgelinta Barnaamijka Xagaaga 2022, da'yarta aadka uga fog cadaalada waxbarashada waxaa lagu qeexaa inay ku jiraan mudnaanta dhalinyarada ee soo socota: dhalinyarada faqriga ah, dhallinyarada BIPOC (Black, Indigenous and People of Colors), dhalinyarada soo galootiga ah, qaxootiga iyo/ama dhalinyarada soogalootiga ah, Bartayaasha luuqada Ingiriisiga, dhalinyarada ay haysato hoy la'aanta, dhalinyarada dad kale korinayaan, dhalinyarada LGBTQ, dhalinyarada ku lug leh nidaamka cadaalada dembiyada, iyo dhalinyarada naafada ah.

Maalgelinta Barnaamijka Xagaaga 2022 waxa kale oo uu bixin doonaa waqti dheer oo loogu talagalay qorshaynta barnaamijka xagaaga ee bilowga ah iyo soo gudbinta codsiga.

SOWA waxa ay qaban doontaa hanaan loo siman yahay oo la heli karo kaas oo xoojin doona ururada kala duwan si ay u bixiyaan barnaamijyo xagaaga loogu talagay oo tayo sare leh oo ay ku balaariso galaangalka bulshooyinka aan sida fiican loogu adeegin.

**Codsadeyaasha U Qalma:**
Si aad ugu qalanto soo gudbinta arjiga, ururadu waa inay xaqiijiyaan in barnaamijyadooda xagaaga ay ku jiri doonaan isku xirka bulshada iyo dhaqdhaqaaqa jirka iyo dibadda. Fadlan ka arag **Barnaamijyada U Qalma** (hoos) si aad faahfaahin u hesho.

Ururada aan macaash doonka ahayn ee bulshada ku salaysan (Community-based Organizations, CBOs), oo ay ku jiraan ururada diinta, ayaa mudnaanta loo siin doonaa maalgelinta. Ganacsiyada yaryar iyo wakaaladaha dadwaynaha ayaa waliba xaq u leh inay codsadaan.

Lacagaha la siiyo ururrada diiniga ahi ma taageeri karaan barnaamijyada diinta ama agabka, ka qaybqaadashada hawlaha diinta (sida ducooyinka ama casharrada ujeeddo diimeed leh) ma noqon karaan qayb looga baahan yahay ka qaybgalayaasha dhallinyarada.

Codsadayaasha ka fiirsanaya inay u codsadaan ganacsi yar waa inay buuxiyaan qeexida ganacsiga yar ee ku jirta [Xeerka Dib Loo Eegay ee Washington (Revised Code of Washington, RCW) 19.85.020](), gaar ahaan:*, "ganacsiga yar" waxaa loola jeedaa ganacsi kasta, oo ay ku jiraan shirkad gaar ah, shirkad, shuraako, ama hay'ad kale oo sharci ah, oo la leeyahay una shaqeeysa si ka madaxbanaan dhammaan ganacsiyada kale, oo leh konton ama ka yar shaqaale"*

Waaxyaha xadiiqadaha iyo degmooyinka dugsiyadu uma qalmaan; OSPI waxa ay haysaa lacago kale oo loo qoondeeyay hay'adahan.

Lacagaha Barnaamijka xagaaga waxa kaliya oo heli doona ururada u adeega dhalinyarada Gobolka Washington. Barnaamijyada la maalgeliyay waa inay u hoggaansamaan borotokoolka Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington (Washington State Department of Health).

Si aad ugu qalanto, codsadayaashu waa inay bixiyaan barnaamijyo xagaaga loogu talagalay dhalinyarada da'da iskuulka, da'doodu tahay 4-21, kuwaas oo ka diiwaangashan ama hela adeegyada ay bixiyaan dugsiga Barbaarinta-12. Dadka dhallin-yarada ah uma baahna inay helaan adeegyo gaar ah oo ay bixiso nidaamka dugsiga Barbaarinta-12, laakiin waa in laga diiwaangeliyaa ama laga helaa adeegyada dugsiga Barbaarinta-12 mar uun inta lagu jiro sanad dugsiyeedka. Dhallin-yarada guriga wax loogu dhigo waxaa sidoo kale loo adeegsan karaa barnaamijyada xagaaga.

Kaliya hal codsi ayaa laga aqbali doonaa urur kasta. Waxa kaliya ee ka reeban wuxuu noqon doonaa codsade kaasoo sidoo kale u adeegaya maalgeliye sanadeed [2]oo loogu talagalay hay'ad kale oo uqalma. Xaaladahaas, mid walba wuxuu soo gudbin karaa codsi.

---

[2] Kafiil maaliyadeedku waa urur aan faa'iido doon ahayn oo la aasaasay oo leh heerka cashuur-dhaafka Adeegga Dakhliga Gudaha (Internal Revenue Service, IRS) 501 (c) (3) kaas oo oggolaaday inuu helo lacag isagoo ka wakiil ah urur samafal oo aan lahayn (ama aan weli helin) heerka cashuur-dhaafka 501 (c) (3). Codsadayaasha haysta kafaala-qaadka maaliyadeed waxaa looga baahan yahay inay soo gudbiyaan nuqul ka mid ah heshiiska kafiilka maaliyadeed.

Hay'adaha leh iskaashi badan ee gobolka oo dhan, iskaashi walba waxay awoodi doontaa inay codsato, haddii mid waliba leeyahay xaalada cashuurta hay'ada ee u gaar ah ee 501 (c) (3) iyo lambarkeeda aqoonsiga canshuurta ee u gaarka ah.

**Barnaamijyada U Qalma:**
Ku shaqeynta jihada sharci dejinta gobolka, OSPI waxaa ka go'an inuu u isticmaalo lacagahaas si loo xoojiyo i**sku xirnaanta bulshada** ee dhalinyarada oo ay ku mashquuliso dhalinyarada nashaadaadka **jir ahaaneed[3] iyo dibedda.**

Sheeko ahaan, codsadayaasha waxaa la weydiisan doonaa inay sharraxaan isku xirka bulshada, nashaadaadka jir ahaaneed iyo nashaadaadyada dibedda oo ay barnaamijkooda ku dari doonaan, oo ay ka wada hadli doonaan sababta barnaamijkooda xagaaga ay u suurtagalin doonaan in ay wax ka qaban doonto dhalinyarada ay u adeegaan.

Barnaamijka xagaaga ee 2022 waa in la bixiyaa maalmo badan iyo/ama in ka badan toddobaadyo badan. Sababta oo ah xoojinta xiriirinta bulshada ee dhalinyarada waa qayb loo baahan yahay, barnaamijyada xagaaga oo kaliya diiradda lagu saarayo ama inta ugu badan nashaadaadka 1:1 (qof weyn iyo qof dhalinyaro ah) ma buuxin doono shuruudaha u qalmitaanka. Barnaamijyadu waa inay ahaadaan kuwo la soo xaadirayo ama inta badan la soo xaadirayo. Qaybaha isku dhaf ah ama ka qaybgalka dhanka onlaaynka ah ayaa la oggolaan doonaa.

**Waqtiga:**
Ka qeybgalka iyo hagida daneeyayaasha horumarinta dhalinyarada ee guud ahaan gobolka ayaa muhiim u ahaa sameynta maalgelinta barnaamijka xagaaga ee la heli karo. Kahor siidaynta barnaamijka 2021 ee barnaamijka xagaaga ee RFP, SOWA waxay raadisay fikradaha daneeyayaasha ee ku saabsan horumarinta istiraatiijiyadda iyo arjiga. Markii la dhammaystiro wareegga maalgelinta ee 2021, SOWA ayaa jawaab-celin ka soo ururisay ururada helay maalgelinta, iyo kuwa aan helin, si loogu sheego nidaamka Maalgelinta Barnaamijka Xagaaga 2022. Faallooyinka laga helay dadka asaagga ah ee Maalgelinta Xagaaga 2021, iyo wareegyada dheeraadka ah ee daneeyayaasha horraantii Oktoobar, waxay muhiim u ahaayeen awooda SOWA ee ku saabsan wax ka qabashada casharrada la bartay iyo sii wadidda hagaajinta qaabka Maalgelinta Barnaamijka Xagaaga.

Codsiga onlaaynka ah ee loogu talagalay Maalgelinta Barnaamijka Xagaaga ee 2022 waxaa la heli doona Khamiista, Noofembar 4, 2021; codsiyada waxaa la rabaa Isniinta, Diseembar 6, 2021 saacadu markay tahay 11:59 duhurnimo. Barnaamijyada ku guuleysta codsiyadooda waa inay helaan ogeysiinta maalgalinta bartamaha Febraayo, 2022. Lacagaha waxaa loo sii dayn doonaa codsadayaasha guuleysta illaa bartamaha Maajo, 2022. Aqoon isweydaarsi loogu talagalay codsadayaasha guuleysta waxaa la bixin doonaa bisha Maarso, 2022. (Waqtiga oo aad u faahfaahsan ayaa hoos lagu soo daray.)

**Habaka:**
Codsiyada Maalgelinta Barnaamijka Xagaaga waa in lagu soo gudbiyaa onlaayn ahaan isagoo Af-ingiriis ah. Si kastaba ha ahaatee, RFP waxaa loo tarjumi doonaa Amharic, Carabi, Shiinees Mandarin, Kuuriyaan, Marshallese, Ruush, Samoan, Soomaali, Isbaanish, Tagalog, Tongan, Ukrainian iyo Vietnamese. Macluumaadka Helitaanka RFP-yada Tla tarjumay waxaa laga heli karaa websaydka SOWA ee Maalgelinta Barnaamijka Xagaaga 2022.

Nidaamka onlaaynka ah wuxuu codsadayaasha uga baahan yahay in ay u xaqiijiyaan u qalmitaankooda ka hor inta aysan soo gudbin arji. Codsiyada arjiga ee onlaaynka ah wuxuu codsanayaa faahfaahin iyo sharraxaad kooban oo ku saabsan barnaamijyada xagaaga ee codsadayaasha, iyo ururada. Qaar ka mid ah macluumaadkan waxaa la galin doonaa ElevateWashington.org.

Jawaabaha codsadayaasha ee u gaarka ah codsigooda lacageed waxaa ka mid noqon doona xulashooyinka liis hoos u furmaya iyo ka sheekeyn kooban taasoo wax ka qabanaya saddexda dhinac ee diirradda saaran ee ku saabsan Maalgelinta Barnaamijka Xagaaga 2022:

---

[3] Dhaqdhaqaaqa jireed waxaa lagu qeexaa fursadaha dhalinyarada si ay si firfircoon ugu dhaqaaqaan jirkooda oo ay u bixiyaan tamar.

1. Barnaamijka waxaa ka qayb qaadanayo dhallin yarada ka fog caddaaladda waxbarashada.
2. Shaqaalaha, mutadawiciinta, hogaaminta iyo guddi ka socda ururada codsanaya ayaa ka tarjumayaan dadka mudnaanta leh ee loo adeegay.
3. Barnaamijku wuxuu qeexayaa uuna taageeraa isku xirnaanta bulshada, nashaadaadka jir ahaaneed iyo nashaadaadka dibedda ee dhalinyarada**IYO** qorshaha hirgelinta barnaamijka ayaa hubin doona in seddexdan shuruud ee barnaamijka la gaaro ayna ka jawaabaan baahiyaha iyo danaha dhalinyarada loo adeegayo.

Codsadayaasha waxaa la weydiisan doonaa inay bixiyaan shaxanka wadarta kharashaadka hawlgalka ee ururkooda sanadka ugu dambeeyay ee la dhamaystiray.

Codsadeyaashu waxay codsan doonaan qaddarka maalgelinta inta u dhaxaysa $10,000 iyo $50,000.

Foomamka miisaaniyadu looma baahna.

## Caawimaad Farsamo

Kulamada maculuumaadka si looga jawaabo su'aalaha ku saabsan RFP iyo codsiga waxaa lagu qaban doonaa aaladda Zoom markay tahay Talaado, Nofembar 10, 2021 laga billaabo 1:00 duhurnimo-2:30 duhurnimo PST, iyo Talaado, Nofember 16, 2021 laga billaabo 9:00 subaxnimo-10:30 barqanimo PST. Codsadayaasha suuragalka ah waxaa lagu dhiirigelinayaa inay ka soo qeyb galaan. Fadlan booqo websaydka SOWA ee Maalgelinta Barnaamijka Xagaaga 2022 ee si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Si aad isku diiwaangaliso, guji mid ka mid ah taariikhaha hoose:

Nofember 10, 2021, 1:00 duhurnimo - 2:30 duhurnimo
Nofember 16, 2021, 9:00 subaxnimo-10:30 barqanimo

Su'aalaha badanaa la isweydiiyo ee la xiriira RFP iyo codsiga ayaa laga heli karaabogga Maalgelinta Barnaamijka Xagaaga 2022. Dhammaan su'aalaha lagu helay kulamada macluumaadka ama iimaylka waa lagu dhejin doonaa, sidoo kale Su'aala inta badan la is weydiyo ee u ku habboon ee laga helay habka Maalgelinta Xagaaga 2021. Fadlan fiiri waqtiga taariikhaha loo saadaaliyay ee cusboonaysiinta Su'aalaha inta badan la is weydiyo

SOWA waxay bixin doontaa marin u helka caawinaad farsamo ee ikhtiyaariga ah (Technical Assistance, TA) si ururada looga taageero dhanka go'aaminta u qalmitaanka Maalgelinta Barnaamijka Xagaaga 2022, iyo dhammaystirka codsiyadooda. Iyadoo ay u sii dheertahay TA oo toos loogu adeegsanay SOWA, Caawimaada ayaa sidoo kale lagu heli karaa Shabakadda Soo Kabsashada Ganacsiyada Yar-yar. Iskaashatada Waaxda Ganacsiga ee Gobolka Washington (Washington State Department of Commerce) oo lala yeesho shabakaddan kala duwan ee ururada aaminka ah si ay u siiyaan kaalmooyin dhaqan ahaan ku haboon ganacsatada yar-yar iyo ururada samafalka. Codsadayaasha xiiseynaya helitaanka kaalmada farsamada waa inay la tashadaan websaydka Maalgelinta Barnaamijka Xagaaga 2022.

## Hannaanka Qiimaynta Codsiga

Iyada oo lala kaashanayo iskaashatada guud ahaan gobolka, SOWA waxay raadineysaa wacyigelin ballaaran oo ay ku lug yeeshaan qiyaastii 60 codsi qiimeeyeyaal ah, iyadoo xoogga la saarayo matalaada gobolka iyo Black, Indigenous, People of Color (BIPOC) (Madow, Dadka Asaliga, Kuwa Aan Caddaanka aheyn). Qiimeeyeyaasha ay u badan tahay in la doorto ayaa ah kuwa deggan Washington. Ka sokow buuxinta shuruudaha mtalaada ka imanaya tirada dadka mudnaanta leh iyo waayo-aragnimada qiimaynta codsiga, qiimeeyeyaasha waa inay lahaadaan aqoon goboleed iyo faham dhammaystiran oo ku saabsan nidaam deegaameedka horumarinta dhallinta ee Washington.

Dhammaan qiimeeyeyaasha waxaa laga codsan doonaa inay shaaca ka qaadaan danta gaark ah. Magacaabista kooxda qiimeeyeyaasha waxay hubin doontaa in qiimeeyey aan loo xilsaaray inay akhriyaan codsiyada barnaamijyada/ururada ay ugu shaqeeyaan xubin shaqaale ahaan, xubin ka mid ah guddiga, ama la taliyaha guddiga. SOWA waxay u baahan doontaa tababar ka soo horjeedda eexda waxayna ka wada hadli doontaa su'aalaha arjiga iyo heerka qiimaynta iyadoo qayb ka ah tababarka qiimeeyaha ee khasabka ah.

Qiimeeyeyaasha waxay qiimeyn doonaan codsiyada laga helo gobolkooda. Iskaashatooyinka gobolka oo dhan ee u adeegaya qiimeeye ahaan waxaa lagu dari doono kooxaha dhammaan gobollada oo dhan ka jira

Qiimeeyeyaasha ayaa si madaxbanaan u qiimaynaya ku dhawaad 20 codsi. Ka dib marka qiimaynta madaxa banaan dhammaado, kooxo yaryar oo qiimeeyeyaal ah oo qiimeeyey isla codsigaas ayaa ka wada hadli doona herkooda qiimaynta isla markaana ku wada heshiinaya dhibcaha codsi walba. Kooxaha qiimeeyeyaasha waxaa fududeyn doona qiimeeyeyaal hoggaan ah.

School’s Out Washington wuxuu hagi doonaa nidaamka qiimaynta, oo ay ku jirto caawinta qiimeeyeyaash hoggaanka ah, sida loogu baahdo, dhanka fududeynta kooxaha qiimaynta. Marka kooxaha qiimaynta ay dhammeeyaan hannaana dhibcaha iyo qiimaynta oo dhamaysitan, SOWA ayaa qiimayn doonta qiimaynta laga helo dhammaan kooxaha oo dhan.

## Shuruuda Qiimaynta Codsiga

Saddexda dhinac ee diiradda la saarayo ayaa bixin doona qaab dhismeedka qiimaynta codsiga. Iyadoo la adeegsanayo heerka qiimaynta, qiimeeyeyaasha ayaa qiimeyn doonta sida iyo ilaa heerkee:

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Barnaamijku ay ka qaybqaadan doonaan dhalinyarada ka fog caddaaladda waxbarashada. | 35% guud ahaan dhibcaha |
| 2. | Shakhsiyaadka kooxahan soo socda ayaa ah kuwa ka tarjumaya dadka mudnaanta leh ee loo adeego: 1) Shaqaalaha barnaamijka iyo/ama mutadawiciinta si toos ah ula shaqeeya dhalinyarada; 2) hoggaanka barnaamijka; 3) xubnaha guddiga ee mutaddawiciinta ah | 20% guud ahaan dhibcaha |
| 3. | Barnaamijku wuxuu qeexayaa uuna taageeraa isku xirka bulshada, nashaadaadka jir ahaaneed iyo nashaadaadka bannaanka ee dhalinyarada iyo qorshaha hirgelinta barnaamijka waxay hubineysaa in shuruudahan barnaamijyadan la buuxiyo, ayna ka jawaabaan baahiyaha iyo danaha dhalinyarada loo adeego. | 45% guud ahaan dhibcaha |

Iyada oo ay weheliso dhibcaha dib u eegista, metelaad loo wada siman yahay oo ka dhexeeya dadka mudnaanta leh ee gobolka oo dhan, tirada qaybinta juqraafiyeed, tirada dadka dhallin-yarada ah ee ku hawlan, iyo tirada saacadaha la xiriiray, dhammaantood waxay noqon doonaan shuruudaha qiimaynta SOWA. Codsiyada tartanka ee buuxinaya shuruudaha qiimaynta, ururada yar-yar waxay ka heli doonaan tixgelin dhanka talooyinka maalgelinta ee ugu dambeeya oo lagu darrayo OSPI.

## Qaybinta Juqraafiyadeed

Khariidadda hoose waxay sharraxaysaa lix gobol oo dhan, oo la jaan qaada lixda gobol ee maamuleed ee Department of Children, Youth and Families (DCYF) ee Washington.  SOWA waxay u adeegsan doontaa gobollada DCYF si loo qaybiyo juqraafi ahaan markii loo xilsaarayo kooxaha qiimaynta codsiyada iyo go'aaminta maalgelinta.

Yoolalka loogu talagalay qaybinta maaliyaddu guud ahaan gobolka waxaa lagu xiri doonaa laba arin oo muhiim ah oo gaar u ah gobolladaas: dadka yaryar 18 iyo ka yar oo ku nool faqriga; iyo BIPOC dadka yaryar, 18 iyo ka yar. (Xogta waxaa laga soo ururiyey Sahanka Bulshada Mareykanka, 2019.)

Khariidadda hoosta ku taal, qoondaynta boqolkiiba waxay ku saleysan tahay tirada dhalinyarada Washington 18 iyo ka yar oo ku nool saboolnimada iyo boqolleyda dhalinyarada ee Washington ee BIPOC ee dhalinyarada ah 18 iyo ka yar oo ka dhex jira gobol kasta. Xogtan waxaa loo miisaamay si isku mid ah dhanka go'aaminta yoolalkaas loogu talagalay qaybinta lacagaha ee gobolka. In kasta oo ay kuwanu yihiin yoolalka qaybinta juqraafi ahaan, la kulmiddooda waxay noqon doonaan kuwo ku xiraya tirada codsiga aqoonta badan iyo tayada sare leh ee loo helay gobol kasta.




## Maalgelinta Barnaamijka

Maalgalinta waxaa loo heli doonaa barnaamijyada xagaaga 2022 ee dhammaan goobaha gobolka. Maagelinta Barnaamijka Xagaaga 2022 ayaa u dhexeysa $10,000 ilaa $50,000. Codsadayaasha waxaa la weydiisan doonaa inay codsadaan lacag maalgelin oo qiimahaas u dhaxeeya; Si kastaba ha noqotee, maalgalinta la helo ayaa laga yaabaa inay ka yaraato wixii la codsaday.

Codsadeyaasha guuleysta waxaa looga baahan doonaa inay sameeyaan waxyaabaha soo socda:

- Inay qandaraas la saxiixaan School’s Out Washington. Qandaraas tusaale ah ayaa lagu soo daray halkan, ujeeddooyin macluumaad oo keliya. Fadlan la soco qandaraasyada ugu dambeeya ee laga yaabo inay ka duwanaan karaan qandaraaska sambalk ah. Haddii ay taas dhacdo, isbeddelada ayaa loo iftiimi doonaa codsadayaasha la xushay ka hor inta aan loo baahnayn saxeexyada qandaraaska.

- Inay bixiyaan caddeyn ku saabsan caymiska mas'uuliyadda oo ku filan.[4] Faahfaahinta shuruudaha caymiska ayaa lagu soo daray heshiiska sambalka ah
- Foomamka dhameystiran si loo fududeeyo wareejinta lacagaha
- Taariikhda shirkadda oo dhamaystiran ee dhanka Elevate Washington
- Inay buuxiyaan foom si kooban uga hadlaya isbeddelada, haddii ay jiraan, qorshahooda barnaamijka xagaaga 2022 tan iyo markii la soo gudbiyey codsigooda.
- Soo gudbinta warbixin sheekeed ee ugu dambeysa

## Waqtiga

| | |
|---|---|
| Nofembar 4, 2021 | RFP la sii daayey |
| Nofembar 10 iyo Nofember 16, 2021 | Kulamada macluumaadka ee RFP Halkan isk diiwaangeli:<br>Nofember 10, 2021, 1:00 duhurnimo - 2:30 duhurnimo<br>Nofember 16, 2021, 9:00 subaxnimo-10:30 barqanimo |
| Nofember 5 – Disembar 3, 2021 | Caawimaad farsamo ayaa la heli karaa. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan TA ayaa ku jira bogga Maalgelinta Barnaamijka Xagaaga 2022. |
| Nofember 9, Nofember 15, Nofember 22, iyo Nofember 30, 2021. | Su'aalaha soo noqo-noqda oo la cusbooneysiiyay waxaa laga heli karaa bogga Maalgelinta Barnaamijka Xagaaga 2022. Maalinta ugu dambaysa si loo soo gudbiyo su'aalaha soo noq-noqda waxay noqon doontaa Nofeembar 29, 2021. |
| Diseembar 6, 2021 | Codsiyada waxaa la rabaa 11:59 duhurnimo. |
| Diseembar 9, 2021 – dhammaadka Janaayo 2022 | Qiimaynta codsiga ee kooxda SOWA iyo qiimaynta asaxaabta |
| Kama dambays bartamaha<br>Febraayo, 2022 | Qiimaynta OSPI iyo oggolaanshaha talooyinka deeq lacageedka.<br><br>Ogeysiinta maalgelinta codsadayaasha guuleysta. |
| Maarso 15, 2022 | Foom si kooban u sharxaya isbeddellada, haddii ay jiraan, oo ah qorshayaasha barnaamijka xagaaga 2022 ee codsadayaasha guuleysta tan iyo markii la soo gudbiyey codsiyadooda. |
| Bartamaha Maarso | Kullanka doodda ee Barnaamijka Xagaaga 2022 |
| Ugu dambayn Maajo 13, 2022 | Bixinta lacagta |
| Juun 2022 – Sibtembar 2022 | Hirgelinta barnaamijyada xagaaga |
| Sibtembar 30, 2022 | Waqtiga warbixinta kama dambeyska ah. |

## Guudmarka Codsiga

[4] Ururada lagu maalgeliyo Maalgelinta Barnaamijka Xagaaga 2022 waxa loo tixgalin doonaa qandaraas-hoosaadyada SOWA ee qandaraaska SOWA ay la leedahay OSPI. Sidan oo kale, ururada la maalgeliyay waa inay wataan caymis buuxiya shuruudaha OSPI, oo ay ku jiraan caymiska mas'uuliyadda ee buuxiya xadka qandaraaska, caymiska magdhowga shaqaalaha, iyo caymiska baabuurta (sida ku habboon.) Kahor bixinta lacagaha, SOWA waxay u baahan doontaa shahaado caymis oo u magacaabaya SOWA iyo OSPI sida caymis qaate dheeraad ah ahaan.

Su'aalaha iyo macluumaadka loo baahan yahay si loo buuxiyo arjiga Maalgelinta Barnaamijka Xagaaga 2022 ayaa hoos ku taxan. Waxaa ku jira jawaabo liis hoos u furmaya iyo kuwo sharaxaad u baahan.

Sambalka codsiga waxaa la bixiyaa bilowga codsiga olnaaynka ah. Waxaan ku talineynaa in codsadayaashu adeegsadaan shaxanka si ay dib ugu eegaan su'aalaha oo qoraan jawaabaha. Marka jawaabadu ku dhammaato foomka, codsadayaashu waxay ku koobi gareeyn karaan foomka arjiga ee onlaaynka ah si loo gudbiyo.

Codsiyada waa in lagu gudbiyaa [onlaayn ahaan.] Codsadayaashu waxay kaydin karaan shaqadooda waxayna dib ugu ku noqon karaan arjiga. Tilmaamaha keydinta iyo ku soo noqoshada codsiyada waxaa lagu bixiyaa arjiga. Codsiyada waa in la buuxiyaa oo la gudbiyaa Isniinta, Diseembar 6, 2021 saacadu markay tahay 11:59 duhurnimo.

**Macluumaadka U Qalmidda**

Fadlan xaqiiji in ururkaagu u qalmo inuu dalbado maalgalinta:

- Ururkaaga:
    - wuxuu bixin doonaa barnaamijka xagaaga 2022.
    - wuxuu u hoggaansami doontaa shuruucda Washington State Department of Health
    - waa urur bulsheed oo samafal ah, ganacsi yar ama hay'ad dadweyne.
    - wuxuu u adeegi doonaa dhalinyarada da'doodu tahay 4-21 ee Gobolka Washington, kana diiwaangashan ama helaya adeegyada uu bixiyo dugsiga Barbaarinta-12.

- Barnaamijka Xagaaga 2022 ee ururkaaga waxaa:
    - ku jiri doona waxqabadyada loogu talagalay in lagu xoojiyo isku xirnaanta bulshada ee dhalinyarada
    - ku jiri doona nashaadaad jireed
    - ku jiri doona nashaadaadka dibadda
    - bixin doonaa maalmo kala duwan/iyo ama toddobaadyo kala duwan
    - loo bixin doonaa toos ama toos u badan

Waaxyaha xadiiqadaha iyo degmooyinka dugsiyadu uma qalmaan.  Lacagaha looma adeegsan karo barnaamij 1:1 ah ama nashaadaad diineed.

**Macluumaadka Barnaamijka/Ururka**

- Barnaamijkeena xagaaga waxaa si isdaba joog ah u kafaala qaadaya urur aan macaash doon ahayn:
    - Haa
    - Maya

  *Hadday haa tahay, waxaa lagaa rabi doonaa inaad soo geliso warqad saxiixan oo ka timid hay'adda maalgelinaysa oo xaqiijisa xiriirka maalgelinta.

- Dooro dhammaan degmooyinka loogu adeegay Barnaamijka Xagaaga 2022 kuwaas oo ah diiradda codsigan:

- Magaca sharciga ah ee ururka:

- Magaca ururka maalgelinaya, haddii ay khusayso:

- Lambarka Aqoonsiga Loo Shaqeeyaha (Employer Identification Number, EIN):

*Fiiro gaar ah*: Haddii barnaamijka/ururka uu leeyahay taaba-galiye maaliyadeed, fadlan ku qor EIN-*ka taaba-galiyaha maaliyadeed*

- Lambakra Aqoonsiga Ganacsiga Midaysan (Unified Business Identifier, UBI):
  *Fiiro gaar ah*: Haddii barnaamijka/ururka uu leeyahay taaba-galiye maaliyadeed, fadlan ku qor UBI-ga taaba-galiyaha maaliyadeed

- Maxay ahaayeen wadarta kharashaadka hawlgelinta ururkaaga sannad-maaliyadeedkii ugu dambeeyay ee dhammaaday?

- Goormuu dhamaaday sanad maaliyadeedkaas?

- Nooca ururka:
  *Fiiro gaar ah*: Haddii barnaamijka/ururka uu leeyahay taaba-galiye maaliyadeed, fadlan ku qor nooca taaba-galiyaha maaliyadeed
    - Hay'ad samafal
    - Ganacsi yar
    - Shirkad dadweyne (fadlan qeex): ___
    - Wax kale (fadlan qeex): ___

- Cinwaanka Jireed ee Koowaad
    - Cinwaanka oo dhamaystiran (oo ay ku jiraan abaartmeentada/qaybta/xafiiska haddii ay macquul tahay)
    - Magaalada/Beledka
    - Goblka
    - Zip Code
    - Degmada

- Sharaxaad: Bixi sharraxaad kooban oo ku saabsan ururkaaga (hammi, himilo, adeegyo, diiradda)  Tirada ereyada ugu badan waa 200.
  *Fiiro Gaar ah*: Macluumaadkan waxaa lagu dari doonaa ElevateWashington.

- Magaca goobta:
  *Fiiro Gaar ah*:Haddii aad codsanayso magaca goobo badan, fadlan ku dar magaca iyo ciwaanka mid ka mid ah goobahaas halkan.

- Cinwaana goobta:
  *Fiiro Gaar ah*: Cinwaanka goobta waa inuu ku yaalaa Gobolka Washington
    - Cinwaanka oo dhamaystiran (oo ay ku jiraan Abaartmeentada/Qaybta/Xafiiska haddii ay macquul tahay)
    - Magaalada/Beledka
    - Gobolka (WA)
    - Zip Code
    - Degmada

- Magaca Barnaamijka Xagaaga 2022

- Sharaxaad: Bixi sharaxaad kooban oo ku saabsan barnaamijkan (cida loogu talagalay, diiradda barnaamijka)
  Tirada ugu badan ee ereyada waa 150.
  *Fiiro Gaar ah*: Macluumaadkan waxaa lagu dari doonaa ElevateWashington.

- Ururka codsadaha, iyo goobaha iyo barnaamijyada magacyada iyo meelaha sida halkan lagu sheegay, waxaa lagu dari doonaa liiska barnaamijka dhalinyarada dadweynaha ee ElevateWashington. Haddii goobta ay tahay mid sir ah, fadlan halkan calaamadee si aad u codsato in aanay ka soo bixin liiska barnaamijka.
    - Meeshu sir maaha - Waa caadi in lagu daro liiska
    - Goobtu waa qarsoodi - haku darin liiska

**Su'aalaha Codsiga:**

**Meesha diirada #1: Barnaamijku waxaa ka qayb galayo dhallinyarada ka fog cadaalada waxbarashada. Goobtan diiradda la saarayo waxay u qalantaa 35% dhibcaha.**

Jawaabaha su'aalaha hoose waa inay ahaadaan kuwo gaar u ah Barnaamijka Xagaaga 2022 kaas oo aad u raadinayso maalgelin.

a. Su'aasha hoose (1b) waxay ku weydiinaysaa inaad noo sheegto boqolkiiba inta dhalinyarada ah ee ku jira barnaamijkaaga xagaaga ee qayb kasta oo ka mid ah qaybaha mudnaanta leh. Kahor intaadan bixin macluumaadka ku saabsan dhalinyarada, fadlan noo sheeg isha xogtaada:
    - Boqolkiiba waxay ku salaysan yihiin xogta laga soo sheegay dhalinyarada ama qoyska.
    - Boqolkiiba waxay ku salaysan yihiin ilaha xogta dhow, sida degmo dugsiyeedka ama xogta tirakoobka.
    - Boqolkiiba waa qiyaaso ku salaysan aqoontayada bulshadeena dhalinyarada.
    - Hadda ma ururinno, ama ma hayno xogta kaydsan, ee mid ka mid ah macluumaadkan kuma qanacsanin qiyaasida boqolleyda su'aashan.

    **Xitaa haddii aadan bixin boqolleyda dadka mudnaanta leh, dhammaan codsadayaasha waa inay weli bixiyaan sharaxaad faahfaahsan oo ku saabsan bulshadooda dhalinyarada ee su'aasha 1e ee hoose.**

b. Fadlan qiyaas boqolkiiba dadka da'da yar ee qaybahan ee ka qaybqaadan doona Barnaamijka Xagaaga 2022. Waxaan fahamsannahay in dhallinyaro badan ay soo gali doonaan qaybo badan; boqolkiiba uma baahna inay noqdaan illaa 100%. Fadlan tan ku salee xogta barnaamijkii hore, xogta diiwaangelinta hadda, ama xog kale oo u dhow sida xogta tirakoobka dugsiga. Waxaad heli doontaa fursad aad noogu sheegto wax badan oo ku saabsan bulshadaada sheekada soo socota:

    Fadlan dhig eber haddii aadan filaynin in dadka da'da yar ee mudnaanta leh ay ka qaybqaataan Barnaamijkaaga Xagaaga 2022. Fadlan waxba haku qorin haddii qiyaas aan loo heli karin dadka mudnaanta leh. Marka laga reebo haddii "Ma ururineyno xogtan hadda" kor lagu doortay, waxaa lagaa rabaa inaad su'aashan ka jawaabto:

    - Dhalinyaro faqri ah, sida lagu cabiray u qalmitaanka qadada bilaashka ah ama qiimaha jaban: __%
    - Dhallinta BIPOC: __%
    - Dhallinta soo galootiga ah: __%
    - Dhallinta qaxootiga iyo/ama soo galootiga ah: __%
    - Kuwa barta luuqada Ingiriiska: __%
    - Dhallinta derbi jiifka ah: __%
    - Dhallinta dad kale korsanayaan: __%
    - Dhallinta LGBTQ: __%
    - Dhallinta ku lugta leh nidaamka caddaaladda dambiyada: __%
    - Dhallinyarada naafada ah, oo ay ku jiraan naafo jireed, korriin, iyo/ama maskaxeed; ama baahiyaha daryeelka caafimaadka gaarka ah: __%

c. Fadlan qiyaas boqolleyda guud ee dhalinyarada barnaamijkaaga kuwaas oo matalaya mid ama in ka badan oo ka mid ah dadka mudnaanta leh.: __%

d. Haddii barnaamijkaagu u adeego dhalinyarada BIPOC, fadlan bixi boqolleyda dadka da'da yar ee matalaya mid kasta oo ka mid ahdadweynaha dhalinyarada BIPOC.  Waxaan fahamsannahay in dhallinyaro badan ay soo gali doonaan qaybo badan; boqolkiiba uma baahna inay noqdaan illaa 100%.
    - Hindida Mareykana/U dhashay Alaska: __%
    - Aasiyaan/Aasiyaan Mareykan ah: __%
    - Madow/Mareykan Afrikaan ah: __%
    - Hisbaanik ama Laatino/a/x Asalka: __%
    - Barriga Dhexe ama Waqooyiga Africa: __%
    - Qowmiyad Badan leh: __%
    - U Dhashay Hawaii/Jasiiradaha Baasifiga: __%

e. **Ka Sheekeey:** Wax nooga sheeg dhalinyarada beeshaada ah ee ka qayb qaadan doona barnaamijkaaga xagaaga 2022, oo ay ku jiraan sida ay u matalaan mid ama in ka badan oo ka mid ah dadka mudnaanta leh. Sharaxaad ka bixi sida barnaamijkaagu uga qaybgelin doono dhalinyarada ka mid ah kooxaha dadweynaha ee mudnaanta leh.

    **Tirada ugu badan ee ereyada waa 400**

**Aagga diiradda #2: Barnaamijku waxa uu leeyahay shaqaale, mutadawiciin, hoggaan iyo xubno guddiga kuwaas oo ka tarjumaya mudnaanta dadweynaha loo adeego, sida kor ku xusan su'aasha #1. Goobtan diiradda la saarayo waxay u qalantaa 20% dhibcaha.**

a. Fadlan qiyaas boqolleyda dadka aqoonsigoodu/waaya-aragnimadooda nololeed lagu darayo mid kasta oo ka mid ah qaybaha dadweynaha ee mudnaanta leh.
    - Shaqaale iyo mutadawiciin si toos ah ula shaqayn doona dhalinyarada Barnaamijka Xagaaga 2022: __%
    - Hogaamiyayaasha barnaamijka kuwaas oo kormeeri doona oo ilaalin doona Barnaamijka Xagaaga 2022: __%
    - Xubnaha guddiga ururka/barnaamijka: __%

b. **Ka Sheekeey:**Sharaxaad ka bixi sida shaqaalaha barnaamijkaaga, tabaruceyaasha, hogaanka iyo xubnaha guddiga ay u yihiin kuwo ka tarjumaya (ay wadaagaan aqoonsi ama khibrado nololeed oo la mid ah) ee mudnaanta da'yarta ee u adeega barnaamijkaaga xagaaga.

    **Tirada ugu badan ee ereyada waa 350**

**Aagga diiradda #3: Barnaamijku wuxuu qeexayaa uuna taageeraa isku xirka bulshada, nashaadaadka jir ahaaneed iyo nashaadaadka bannaanka ee dhalinyarada iyo qorshaha hirgelinta barnaamijka waxay hubineysaa in shuruudahan barnaamijyadan la buuxiyo, ayna ka jawaabaan baahiyaha iyo danaha dhalinyarada loo adeego. Goobtan diiradda la saarayo waxay u qalantaa 45% dhibcaha.**

Nooca barnaamijka: Fadlan sheeg nooca barnaamijka aad ku bixinayso lacagaha Barnaamijka Xagaaga 2022: (Sax dhammaan inta ku habboon.)

- Waxbarasho
- Fanka iyo Dhaqanka
- Shaqo Raadin iyo Tababar Shaqo

- Daryeelka Caruurta
- Hoggaanka, Adeegyada iyo Caddaaladda Bulshada
- Nashaadaadka Jireed iyo Ciyaaraha
- Saaynis, Tiknoolojiyad, Injineeriyad iyo Xisaab (Science, Technology, Engineering and Math, STEM)
- Adeeg iyo Taageero
- Wax kale (fadlan qeex): ________

Barnaamijkaaga Xagaaga 2022 wuxuu u adeegi doonaa dhalinyarada kuwaas oo da'dooda tahay: (Sax dhammaan inta ku habboon.)

- 4-12
- 13-18
- 19-21

Tirada dhalinyarada loo adeegayo:

- < 20 dhallinyaro
- 20-50 dhallinyaro
- 51-100 dhallinyaro
- > 100 dhallinyaro

Barnaamijka waxaa lagu qaban doonaa:

- Kaliya soo xaadirid
- Isku dhafan: soo xaadirid iyo dhanka onlaaynka

Ma yahay barnaamij nooca imaanshaha?

- Haa
- Maya

Muddada barnaamijka:

- 1-2 toddobaad
- 3-5 toddobaad
- 6 ama in ka badan oo toddobaad

Immisa maalmood ayaa barnaamijka la bixinayaa todobaadkii?

- 1-2 maalmood toddobaadkii
- 3-4 maalmood toddobaadkii
- 5 maalmood toddobaadkii
- Wax kale (fadlan qeex):

Saacadda barnaamijka ee maalintii:

- 1-2 saacadood maalintii barnaamijka
- 3-4 saacadood maalintii barnaamijka
- 5-6 saacadood maalintii barnaamijka
- 7-8 saacadood maalintii barnaamijka
- In ka badan 8 saacadood maalintii

**Ka Sheekeey:** Ka hadal nakhshadeynta iyo qorshaha hirgelinta barnaamijkaaga xagaaga labadaba. Ka fakar ***waxa*** aad samayn doonto, ***sababta*** nashqadaadu ay uga jawaabeyso dhalinyarada aad u adeegi doonto, iyo ***sida*** aad u fulin doonto barnaamijka. Ku sheeg dhammaan waxyaalaha soo socda jawaabtaada:

1. Bixi dulmarka guud ee barnaamijkaaga xagaaga 2022. Sidee u qorshaynaysaa inaad u hirgeliso? (*Qiimeeyeyaasha waxay fahmi doonaan in dhinacyo badan oo dhaqangelin ahi aanay caddayn wakhtigan,*

*iyadoo ay ugu wacan tahay arimo badan, laakiin fadlan soo koob sababta aad u aaminsan tahay in qorshuhu yahay mid suurtogal ah iyo sida aad u doonayso inaad si guul leh u bilowdo barnaamijka.)*

**Tirada ugu badan ee ereyada waa 200**

2. Si faahfaahsan ugala hadal hawlaha aad bixin doonto si loo xoojiyo xiriirka bulshada. *(Bixi tusaalooyin. Qaabku ma ku kala duwanaan doonaa kooxda da'da? Ka caawi qiimeeyeyaasha inay fahmaan sida barnaamijkaagu u xoojin doono xiriirka bulshada ee dhalinyarada)*

   **Tirada ugu badan ee ereyada waa 200**

3. Waa maxay nashaadaadka jirka ee barnaamijkaaga lagu darayo? *(Soo koob. Nashaadaadka ma ku kala duwanaan doonaa kooxda da'da? U sharax qiimeeyeyaasha waxa saxda ah ee la siin doono dhalinyarada.*

   **Tirada ugu badan ee ereyada waa 150**

4. Waa maxay nashaadaadka dibadda ee barnaamijkaaga lagu darayo? *(Soo koob. Nashaadaadka ma ku kala duwanaan doonaa kooxda da'da? U sharax qiimeeyeyaasha waxa saxda ah ee la siin doono dhalinyarada.*

   **Tirada ugu badan ee ereyada waa 150**

5. Sharax sababta nooca barnaamijkaaga wax ku ool u yahay oo uu ka jawaabayo baahiyaha dadka mudnaanta leh ee dhalinyarada. *(Ka caawi qiimeeyeyaasha inay fahmaan fikradda ka dambaysa qaabeynta barnaamijkaaga.)*

   **Tirada ugu badan ee ereyada waa 250**

**Codsiga lacagta:** Barnaamijyada Xagaaga 2022 ayaa laga yaabaa inay codsadaan inta u dhaxaysa $10,000 iyo $50,000. Lacagaha waa in la bixiyaa kama dambays Sibtembar 30, 2022.

Waa in la galiyaa tiro u dhaxaysa 10,000 iyo 50,000

**Shahaadooyinka:**

Magaca qofka buuxinaya foomkan

Cinwaanka iimaylka: Lambarka taleefanka:

Dhammaan codsadayaasha helaya maalgelinta waxaa looga baahan doonaa inay soo gudbiyaan W-9 oo saxiixan oo dhammaystiran. Lacagaha waxaa lagu bixin doonaa si elektaroonik ah iyadoo la adeegsanayo Nidaamka Dirridda Otomaatiga ah (Automated Clearing House, ACH). School's Out Washington wuxuu codsadeyaasha guulaysta u diri doonaa foomka oggolaanshaha ACH iyo foomka W-9 iyadoo la adeegsanayo DocuSign. Soo celinta dukumeentiyadan waxaa loo baahan doonaa todoba maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta la helo. Fadlan sheeg cidda loo diri karo foomka ACH iyo W-9.

Magaca: Cinwaanka Iimaylka:

Dhammaan codsadayaasha helaya maalgelinta waxaa looga baahan doonaa inay heshiis la saxiixdaan School's Out Washington. Fadlan sheeg cidda heshiiska loo dirayo si loo saxiixo.

Magaca: Cinwaanka Iimaylka:

Haddii la maalgeliyo, codsaduhu wuxuu oggolaaday inuu siiyo School's Out Washington xuquuqda gelitaanka Foomkeeda 990 iyo diiwaannada maaliyadeed ee kale lix sano ka dib taariikhda maalgelinta, dhammaan waqtiyada macquulka ah si loo xaqiijiyo macluumaadka maaliyadeed ee lagu soo bandhigay codsigan.

Fadlan sax dhammaan sanduuqyada. (Dooro linkigan si aad u aragto qeexitaanka ganacsi yar RCW19.85.020)

"Waxaan cadeynayaa in la ii oggolaaday inaan soo gudbiyo codsigan anigoo ku hadlaya magaca ururka codsadaha."

"Waxaan cadeynayaa, markaan saxiixo codsigan in aan hay'adda codsadaha iyo maamulayaasheeda midkoodna hadda laga saarin, laga joojijin, loo soo jeedin in laga saaro, aan lagu dhawaaqin inuusan u qalmin, ama si ikhtiyaari ah aysan ka qaybgalka macaamilkan kaga saarin mid kasta oo dowlad ama gobol ama wakaalad ah."

"Waxaan cadeynayaa in haddii loo codsado ganacsi yar, ganacsigeygu uu buuxiyo qeexida ganacsiga yar ee lagu bixiyey RCW19.85.020.

"Waxaan cadeynayaa in barnaamijka la sharraxay uusan ku jirin cibaado diimeed, jimicsiga, ama waxbarasho. Haddii codsigu guulaysto, ka qaybgalayaasha loogama baahna inay ka qaybqaataan cibaado diimeed, jimicsi, ama waxbarasho si ay u helaan tas-hiilaad.

"Waxaan cadeynayaa in macluumaadka lagu bixiyey codsigan iyo macluumaadka lagu bixiyey dukumeenti kasta iyo foomamka taageeraya ay run iyo sax yihiin dhanka dhammaan dhinacyada agabka. Waxaan sidoo kale fahamsanahay in qoraal kasta oo been abuur ah ama ka reebis ula kac ah oo ku saabsan codsigan ay sababi karaan inaan lacagta dib u soo celiyo ama tallaabooyin kale oo sharci ah oo loogu talagalay been abuurka."